



# Taariikhda saaritaanka: dhammaan ardaydu waa inay oofiyaan shuruudaha tallaalka ugu dambayn 19 Febraayo

*Taariikhda saaritaanka ee sanadlaha ah, ee ay tahay dhammaan ardaydu inay qaateen tallaalada loo baahan yahay, aad ayey u soo dhawaatay. Saaxiibadayada ka socda Degmada Adeegga Waxbarashada Multnomah ayaa nala wadaagay farriinta soo socota:*

## **Haoggolaan ilmahaagu inuu dugsiga ka maqnaado**

Haddii ilmahaaga uu tallaal ka maqan yahay, hadda ayaa ugu dhaw inaad tallaasho. **19 Febraayo, 2020** waa maalinta ka saaritaanka dugsiga. Taariikhdan, ardayda PPS ee aan tallaalku u dhammaystirnayn awood u yeelan maayaan inay aadaan dugsiga ama daryeelka ilmaha degmadu bixiso. Fiiri [shuruudaha tallaalka dugsiga](#).

## **Halka aad ilmahaaga ka soo tallaalayso**

Waxaad ilmahaaga ka soo tallali kartaa daryeel-bixiyihiiisa caafimaadka ee caadiga. Haddii ilmahaagu aanu lahayn daryeel-bixiye caadi ah ama aadan ballan qabsan karin, waxaad ka soo tallali kartaa meelaha soo socda mid kamid ah:

### [Xarumaha Caafimaadka Ardayga ee Degmada Multnomah](#) (SHCs)

PPS waxay wada shaqayn la bilawday Waaxda Caafimaadka Degmada Multnomah si ay u siiyaan adeegyo ka hortag, aasaasi ah iyo daryeelka caafimaadka maskaxda oo dhammaystiran dhammaan carruurta da'da dugsiga gaartay ee Degmada Multnomah iyadoon la eegin awoodda iska bixinta kharashka halkan **Xarumaha Caafimaadka Ardayga** ee dugsiyada sare ee PPS ee soo socda: **Cleveland, Franklin, Jefferson, Madison (ku yaal Marshall), iyo Roosevelt.**

- [Dhammaan goobaha iyo saacadaha SHC](#)
- Ardayda PPS da'aha 5-18 jir waxa si bilaad lacag ah looga tallaali karaa Xarunta Caafimaadka Ardayga PPS ee ugu dhaw. Ardaygaaga PPS uma baahna inuu tago dugsiga si uu daryeel u helo.
- Xarunta Caafimaadka Ardayga PPS way aqbashaa dhammaan noocyada caymis yada, oo uu kujiro Kaiser, una adeegtaa cidda aan caymis lahayn.

### [Rugaha Daryeelka Koowaad ee Degmada Multnomah](#)

- Tallaalo qiime jaban ama bilaash ah ayey carruurtu ka helaan, oo ay kujiraan kuwa aan caymiska lahayni.
- Wac 503-988-5558 si aad u qabsato ballan bukaan cusub.

### **Warqad ma kuu gaartay?**

Qoysaska ardayda diiwaanadoodu muujinayaan inuu tallaal ka maqan yahay waxay heleen warqad ka socota Degmada Adeegga Waxbarashada Multnomah (MESD) bishii Noofambar. Soo qaado warqadda iyo diiwaanada tallaalka ilmahaaga marka aad ilmahaaga soo tallaalayso. Tallaalku waa mid kamid ah qaababka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo cudurrada oo qof kasta caafimaadkiisa loo ilaalin karo.